

Codsadaha qaaliga ahow,

Waad ku mahadsan tahay codsigaagga aad codsatay Barnaamijka (Metro Transit's Limited Mobility Program). Barnaamijku waxa uu fidiyaa kiro jaban ku raacida gaadiidka dadweynaha si loogu dhiiri geliyo macaamiisha naafanimadooda la aqoonsan yahay inay isticmaalaan adeegyada gaadiidka dadweynaha ee nawaaxiga. Darawalada Baasaska Metro Transit iyo/ama Metro Transit Police waa ay aqbalaan Kaarka Limited Mobility ID Card, Metro Mobility ID Card, ama kuwa ay ku qoran yihiin "A" ama "L" ee kaarkaaga Aqoonsiga Minnesota (Minnesota ID Card) ama Laysinka Wadaha (Driver's License) si aad u bixiso kirada la jabiye.

Fadlan ha buuxinin codsigan hadii aad hadda xaq u leedahay inaad raacdo Metro Mobility (sida, adeegyada ka albaab-ka-albaabka ah).

Noocyada Barnaamijka

Hadii lagu ansaxiyo, waxaa heli Kaarka (Go-To Card) oo magacaaga iyo waqtiga uu dhacayaa ay ku dul-qoran yihiin. Kaarka (Go-To Card) waxaa markiiba lagu qori adiga waxaadna awoodi doontaa inaad lacag ku ridato. Kaarku waxa uu ka jari \$1.00 kirada lagu raaco basaska caadiga ee jidadka magaalada, adeeyada Rapid Bus iyo tareenada. Kaarkaagu sidoo kale waxa uu kuu noqon kaarkaaga (Limited Mobility ID) waxa uuna xaq kuu siin inaad gaadiidka dadweynaha ku raacdo kiro jaban marka aad lacagta cadaan ah isticmaalayso ama marka aad tigrir ka gadanayso Mashiinada Tigidhada Gada ee (Ticket Vending Machine) ama aaladaha (app) ka.

Barnaamijka (Limited Mobility Program) waxa uu u kala qaybiyaa codsabayaasha labo kooxood – nooc rasmi ah iyo nooc ku meel gaar ah (lix bilood). Codsabayaasha loo ansaxiyo nooca ku meel gaar ah waa khasab inay soo bixiyaan codsi cusub lixdii biloodba mar.

Codsigan waa in si buuxda loo soo buuxiyaa. Codsiyada la soo buuxiyo waa khasab in lagu hagaajiyo ciwaanka ah:

Metro Transit – Limited Mobility Program  
560 6th Avenue North,  
Minneapolis, MN 55411-4398

Hadii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan la soo xiriir Xafiiska Xiriirka Macmilka ee Metro Transit (Metro Transit Customer Relations) ee 612-373-3333, codadka ka dooro 3.